

## Waa muhiim in la jimicsado xataa waqtigan cudurkan karoona lagu jiro.

**Cayaara kooxeedyadu dib bey u bilaabi karayaan tobobardooda iyo ciyaarhooda mar kale. Dadka da'doodu tahay 70 sano iyo wixii ka weyn guriga dibaddiisa ayay ku jimicsan karayaan. Laakiin waa hadday raacayaan oo kaliya talo soo jeedinta hay'dda caafimaadka.**

Cayaara kooxeedyadu dib bey u bilaabi karayaan tobobardooda iyo ciyaarhooda mar kale. Dadka da'doodu tahay 70 sano iyo wixii ka weyn guriga dibaddiisa ayay ku jimicsan karayaan. Laakiin waa hadday raacayaan oo kaliya talo soo jeedinta hay'dda caafimaadka. Waa muhiim dhammaan da'aha oo idil in ay jimicsadaan. Carruurta iyo da'yarta waxaa loo ogolaa in ay tobobartaan oo ay ciyaaraan inta lagu gudo jiro xaaladda adag ee koronaha. Laakiin qaab ka duwan qaabkii hore bay cayaarhooda u cayaaraan, si aan keeneyn in dad badani mar wada kulmaan bey u sameeyaan. Laakiin dadka waaweyn ee cayaara, cayaara kooxeedyo kala duwan looma ogolaan iney tartamaan oo ay cayaaraan.

Hadda hay'adda caafimaadku waxa ay go'aamisay in dhammaan cayaara kooxeedyadii ay dib u bilowdaan tartanadoodii laga bilaabo 14-ka bisha juun. Laakiin waa haddii uu qofku raacayo xeerarka khuseeya si is qaadsiiintu aysan u faafin. Ururka cayaaraha qaranka waxa ay soo saareen dhawr talo oo ku saabsan sida qofku uu u yareyn karayo fiditaanka cudurkan karoona. Kuwo ka mid ah talooyinkan waa sidan, waxaa keliya oo la' isu soo dhawaan karayaa marka la cayaarayo. Waa in qofku guriga joogaa marka uu isku arko calaamadaha cudurka.

## Iyo inaaney jirin dad usoo daawasho taga cayaarta.

Hay'adda caafimaadku waxa ay leedahay khatarta ugu weyn ee fidida isqaadsiiinta waxa ay timaaddaa marka la' is cadhiidhiyo, oo dadweyne daawanaya cayaarta goobta yimaadaan. Sidaa darteed ayey ka codsadeen kooxaha cayaaraha iyo ururada in ay u sheegaan taageerayaashooda iney raacaan xadaynta. Haddii aaney sidaas yeelin waxaa dhaci doonta in dib loo mamnuuco cayaaro kooxeedyada mar kale. Waxaa jira kala duwanaansho u dhaxeeya kooxaha heerka sare iyo kuwa iskood isaga cayaara. Cayaaraha kooxaha heerka sare waxa ay keliyoo safri karayaan haddey ay tahay lagamamaarmaan. Kooxda kale looma ogola in ay sidaas sameeyaan. Waxaa loo ogol yahay oo kaliya in ay ka safraan 1-2 saacadood halka ay daganyihiin. Si haddii qof xanuunsado uu si deg deg ah ugu soo laabto gurigiisa.

## Dadka dad'doodu tahay 70 iyo wixii ka weyn wey jimicsan karayaan.

Dadka da'doodu tahay 70 sanno iyo wixii ka weyn, waxa ay u baahan yihiin in ay guryaha ka soo baxaan. Iswiidhan wax karantiin ah oo guryaha lagu ekaanayo kama jiro sida waddamo badan oo kale. Taa bedelkeed waa in aan raacnaa talooyinka hay'adaha caafimaadka. Sidaa darteed qofka ay da'diisu tahay 70 sanno ama ka weyn waa uu u soo bixi karaa dibadda oo soo soc socon karaa, cayaari karaa cayaarta qori kubadeedka ama wixii kaloo cayaar ah ee uu qofku ka helo. Waxaa kaloo uu qofku dibadda guriga kula kulmi karaa hal ama laba saaxiib. Laakiin waa in la kala fogaadaa oona la joogaa meel aaney dadku ku badneyn. In meel dibadda lala fariisto hal ama laba saaxiib oo wax lagu cuno waa la sameyn karaa, waase in la kala durkaa.

Haddii talooyinkan la raaco wey yaraanaysaa khatartu oo waxaa badanaysa faa'ii dada laga leeyahay cayaaraha, sidaana waxaa yiri Johan Carlsson oo ah madaxa hay'adda caafimaadka.



Hay'adda ka hortaga masiibooyinka ee gobolka Kalmar waxay wada shaqen ka dhaxaysaa dhammaan degmooyinka gobolka Kalmar, Maamulka iyo dhammaan hay'adaha dawliga ee gobolka ka jira. Dhibaataada ku timaada mujtamaca wadajir ayaa loo go'aamiyaa la iskana kaashada. Hadda waxaa intii suurtoogala si fiican loola tacaalaya cudurka corona.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar